



“Baqdin baa nagu jirtay markii hore, laakiin aad baan ugu faraxsanahay in aan wacnay. Hadda laba jirkeygu waxuu baranayaa socodka. Waxaan kaloo baranay hab aan si siyaado ah u isticmaalno xadaraadka uu maalin walba qabto.”

- Hooyo reer Minnesota ah

## Noloshu wey idiin hagaageysa, ilamahaaga iyo goyskaba.

Howlaha adeeg hor u bilowga ilmaha, iyo mucaawinada waxaad masaamaxeysa:

- In aad caawiso qoyskaaga oo idil.
- In aad barato ilmahaaga awoodooda, kartidooda iyo baahida qaaska ah oo ay leeyihiin.
- In aad si kalsooni leh go'aan uga gaarto howlaha ilmahaaga u baahan yihiin.

## Waa in aad wacdaa

Ilmo waliba waxuu u qalma in uu si fiican, u koro, u kalabaxo, iyo in uu waxbarto caawimaadka si dagdag iyo hawl yaraan ah ayaad u heli kartaa.

- Hadii aad wax su'aal ah qabtid-aadan hubin su'aalha qaarkood, waxaad soo Wacdaa-PACER Center telafoonka ah 952-838-9000 ama 800-537-2237 (lacag la'aan). Waxaad codsataa in aad la hadasho Hassan Samantar. Waxaad kala. Hadli kartaa wixii su'aal ah ee aad qabto iyo goobaha aad ka heli karto caawimaad. Waxa kale oo aad ka heli kartaa qoraal ku qoran af Somali.
- Waxa aad wacdaa dagmada iskuulku kuyaal adiga oo ka codsanayaa in aad lahadasho qofka uqaabilsan Waxbarashada gaar ahaaneed ee Adeegyad hore ee ilmaha. Waxa kuu banana in aad codsan kart qof turjubaan ah. Waxaad waydiisaa in ilmahaagu u qalmi karo waxqabadka hore ee caruurta (childhood services).
- Wac barnaamijka Minnesota ee loo yaqaan Help Me Grow, oo ah barnaamij amuuraha badbaadinta ilmaha dhalaanka ah iyo waxbarashada dugsiga xannaanada. 866-693-4769

## Waalidka



**Ma ka fikirtaa sida ilmahaaga yar ay:**

**Wax u arkaan ama u maqlaan?**

**U socdaan ama u ciyaaraan?**

**U hadlaan ama wax u bartaan?**

**U dhaqmaan?**

***Raadi talaabta xigta ee aad qaban lahayd.***

**PACER CENTER** 

KOOXDA UGU HOREYSA HALGANKA WAX U OABADKA CARUURTA LAXAADKA LAA™

**PACER.org**

8161 Normandale Boulevard | Minneapolis, MN 55437-1044

Voice (952) 838-9000 | Toll-free (800) 53-PACER

E-mail: PACER@PACER.org

Funding for these activities is made possible with a grant from MDE.  
The source of the funds are from federal award, State Personnel Development Grant.

## **Waxaa dhacda in walwalku kaa yaraado hadii aad baadhitaan samayso.**

Waalid badan ayaa ka walwala in ilmahoodu sida ugu wanaagsan ee munaasabka ah u korayaan, weynaanayaan, ama sida ugu wanaagsan ee awoodoodu tahay wax u baranayaan. Haduu fikirku isku badalo walwal:

- Waxaad lahadashaa dhakhtarka ilmahaaga.
- Hadii aadan ku qancin oo aad weli walwal qabto, baaritaan kale samee.

Waad ku farxi doontaa in aad sidaa yeeshay.

## **Waxa ilmahaaga u roon, kolba sida degdegga ah ee aad wax qabadka u bilaawdo.**

Caruurta qaarkood waxey u baahanyihiin caawimaad dheraad ah si ay u bartaan xirfadaha muhiimka ah sida gurguuradka, socodka, iyo hadalka. Hadey ilmahaaga si dagdaga ah ee ilmahaagu u helaan caawimada ayaa ah:

- Sida degdegga ah oo hore wax u bartaan
- Sida degdegga ah oo ay waxbarashda ugu fududaato marka ay bilaabaan dugsiga

Dagmada dugsigu ayaa kaa caawin karta sidaad ku ogaan laheyd in ilmahaagu leeyahay baahi gaar ah si ay u helaan caawinaad lacag la'aan ah.



***“Qoyskeyga si ixtiraam leh ayaa loo daryeelay.”***



***“Maclimiinta adeegga hor u bilawga amuuraha ilmaha, si foojigan ayeey u dhageysteen akhbaaradda aan horey uga ogaa wiilkeyga, dabadeedna ii sheegeen akhbaaro kale ee caawimaad leh.”***

## **Waxaa diyaar kuu ah caawimaad lacag la'aan ah.**

Hadii ilmaahgu u qalmo howlaha, degmada dugsigu ka tirsanyahay ayaa waxa ay u xil saareysaa qof howsha xiriiriya (coordinator) si aad u hesho waxqabadka iyo taageerada ilmaha iyo qoyskaba. Waxqabadka waxa ka mid noqon kara:

- Adeegyada hore ee ilmaha, waxqabadka iyo howlaha la xiriira sida hadalka (speech therapy), dhaqdhaqaaqa ama socodka (occupational), iyo duugmada jidhka (physical therapy).
- Baaq ah hab aad ilmahaaga ugu caawini karto xirfado kobcid guriga.
- Xiriiro aad la yeelato howlo caawimaad leh ee jaaliyadda ku yaal